

Deeqda Yar ee Ilaalinta Beeraha Magaalooyinka – FY26

Codsiyada Deeqda

**Codsiyada waa in la gudbiyaa ugu dambayntii 4:00 galabnimo, ee Khamiista,
Diseembar 18, 2025**

Iyadoo la waafajinayo Xeerka Xuquuqda Dadka Naafada ah ee Maraykanka (Americans with Disabilities Act), macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo isgaarsiin ah haddii la codsado adigoo wacaya 651-201-6000. Dadka isticmaala TTY waxay la xiriiri karaan Adeegga Gudbinta Minnesota ee 711. Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA) waa shaqo-bixiye iyo adeeg-bixiye fursad siman ah.

Tusmooyinka

Dulmarka Deeqda	3
Guudmar	3
Helitaanka Lacagta	3
Qeexitaanno	4
Mudnaanta	4
Sida loo codsado	5
U-qalmitaanka	7
Codsadayaasha u qalma– Shuruudaha ugu yar	7
Mashaariicda u qalma	7
Kharashaadka u qalma	8
Kharashaadka aan u qalmin	9
Hannaanka Dib-u-eegista Codsiga	10
Hannaanka dib-u-eegista	10
Dib-u-eegista awoodda codsadaha deeqda	10
Iska hor imaadyada danaha	11
Ogeysiiska asturnaanta iyo kala soocidda xogta	11
Shuruudaha uu ku Qasban Yahay Deeq Qaataha	12
Mas’uuliyadda iyo Shuruudaha Warbixinta	13
Kormeerka	13
Lacag-bixinta	14
Wakiillada La Oggolyahay	14
Shuruudaha Qandaraasyada iyo Dalabyada	14
Degmooyinka	14
Kormeerka	15
Xuquuqda Lagu Kansali Karo	17
Qaabka Qiimaynta Mashruuca	18
Su’aalaha ku saabsan Codsiga	20
Macluumaadka Xiriirka iyo Hay’adda	20
Wakiilka la oggol yahay	20
U-qalanka	20
Ku saabsan Beertaada Magaalo	21

Ujeeddada Mashruuca	22
Saamaynta Beerta Magaalo.....	23
Dadka Mudnaanta Leh	23
Qorshaha Shaqada.....	23
Miisaaniyadda.....	24
Sharaxaadda Miisaaniyadda	24
Lifaaqa: Goobaha Magaalooyinka ee iyo Dhulalka Qabiilada u Qalma.....	25

Barnaamijkan waxaa maalgelinaya Waaxda Adeegga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Maraykanka (Minnesota Natural Resources Conservation Service).



Dulmarka Deeqda

Guudmar

Waaxda Beeraha ee Minnesota (MDA) waxay hadda aqbaleysaa codsiyada Deeqda Yar ee Ilaalinta Beeraha Magaalooyinka – FY26. Barnaamijkan waxaa maalgelinaya Waaxda Beeraha ee Federaalka ee Maraykanka (USDA) iyada oo loo sii marayo Adeegga Ilaalinta Kheyraadka Dabiiciga ah (NRCS), lambarka abaalmarinta: NR236322XXXXC004. Dhammaan macluumaadka ku saabsan barnaamijkan waxaa laga heli karaa bogga Urban Farm Conservation Mini-Grant [Urban Farm Conservation Mini-Grant webpage](#).

Codsiyada waa la aqbali doonaa ilaa 4 galabnimo CST, bisha Diseembar 18keeda 2025

Ujeeddada deeqdan waa in lagu taageero beeraleyda ganacsiga ee magaalooyinka si ay u bixiyaan kharashaadka qalabka, agabka, iyo adeegyada ay u baahan karaan si ay u maareeyaan ciidda, biyaha, dhirta, iyo xoolaha iyagoo maskaxda ku haya ilaalinta deegaanka.

Lacagta ugu badan ee deeqdan waa \$5,000.

Lacagaha deeqda waxaa heli kara hay'adaha beeraleyda ganacsiga ee ku saleysan Minnesota kuwaas oo ku beera ama ku dhaqda wax soo saarka beeraha meel magaalo ah, ama u adeega bulshada magaalooyinka, isla markaana iibiyey ama deeq ahaan u bixiyey ugu yaraan \$1,000 oo ah wax soo saarka beerahooda. Noocyo badan oo hay'ado ah ayaa u qalma, fadlan eeg qaybta U-qalmitaanka ([Eligibility](#)) ee Codsigan Soo Jeedinta (Request for Proposals) si aad u hesho faahfaahin.

Helitaanka Lacagta

Waaxda Beeraha Minnesota (MDA) waxay haysaa qiyaastii \$100,000 oo loogu talagalay mashaariicda u qalma iyadoo la adeegsanayo hab dib-u-eegis tartan ah.

Deeqda ugu yar waa \$500 halka deeqda ugu badan ay tahay \$5,000. MDA waxay filaysaa inay bixiso inta u dhaxaysa 20 ilaa 40 deeqood, hase yeeshee tirada guud ee deeqaha iyo qadarka lacagta deeq kasta lagu bixin doono waxaa lagu go'aamin doonaa habka dib-u-eegista soo jeedinta. Heshiisyada qandaraasyada deeqaha waxaa la filayaa inay socon doonaan hal sano, iyagoo bilaaban doona Febraayo 2026 isla markaana ku dhammaan doona Janaayo 2027.

Haddii la doorto, qofka ama hay'adda la siinayo deeqda, waxay bilaabi kartaa inay gasho kharashaadka la oggol yahay oo keliya marka heshiiska qandaraaska deeqda ay dhammaan dhinacyada saxiixaan, isla markaana deeqdu gaarto taariikhda bilowga rasmiga ah.

Is-waafajin maalgelin ah looma baahna.

Qeexitaanno

Ujeeddada codsigan soo jeedinta (RFP), ereyada soo socda waxaa loola jeedaa sidan:

Beerta ganacsiga – macnaheedu waa beer sannadkii soo saartay oo iibisay, ama caadi ahaan la iibin lahaa, \$1,000 ama ka badan oo ah wax-soo-saarka beeraha.

Hababka ilaalinta – waxaa loola jeedaa noocyo kala duwan oo tallaabooyin ah oo beer magaalo ah ay rabto inay qaaddo si ay u xalliso arrimaha la xiriira caafimaadka ciidda, biyaha, dhirta, xoolaha, iyo kheyraadka kale.

Bulsho dhibban – waa magacaabid ku salaysan koodka boostada oo aqoonsata bulshooyinka heerka noloshooda dhaqaale uu si weyn uga hooseeyo bulshooyinka kale. Magacaabistan waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la adeegsanayo [Distressed Communities Index \(DCI\)](#), oo ay samaysay heyada Economic Innovation Group. DCI waxay isku dartaa toddobo cabbir oo xog dadweyne ah si loo qiimeeyo heerka nolosha dhaqaale ee bulshooyinka, oo ay ku jiraan boqolkiiba dadka da'doodu tahay 25 sano iyo ka badan ee aan haysan shahaadada dugsiga sare iyo boqolkiiba dadka ku nool xadka saboolnimada.

Iibinta wax-soo-saarka beeraha – waxaa loola jeedaa haynta, soo bandhigista, ama bixinta cunto si loo iibiyo ama loo isticmaalo; gaadiidka, wareejinta, gorgortanka, dalabka, ama isweydaarsiga cuntada; haynta cunto iyadoo ujeedadu tahay iibin, isticmaal, gaarsiin, gorgortan, dalab, ama isweydaarsi; kaydinta, soo saarista, farsamaynta, baakadaynta, iyo haynta cuntada si loo iibiyo; qaybinta ama bixinta cuntada; ama keenista ama isticmaalka cuntada iyadoo lagu jiro hawl cunto lagu iibiyo ama lagu taageerayo ganacsi cuntada ah, ha lagu sameeyo qof ahaan ama si dadban.

Beeraha magaalooyinka – macnaheedu waa hay'ad ku beerta dalagyada ama ku dhaqda xoolaha magaalo ama tuulo ku taal Minnesota oo leh 5,000 qof ama ka badan, ama u adeegta macaamiisha ku nool magaalo ama tuulo tiradaas dad ah leh; ama ku taalla xuduudaha dhulka qabiilka ee ay federaalku aqoonsan tahay, iyadoo u adeegta xubnaha bulshada qabiilka, iyadoon loo eegin tirada dadka. Hawlaha la xiriira kalluumeysiga iyo dhaqashada shinnida (apiculture) sidoo kale waa qayb ka mid ah qeexitaankan. Eeg [Appendix](#) si aad u aragto liiska goobaha buuxiya qeexitaanka beerta magaalo.

Mudnaanta

Waa siyaasadda Gobolka Minnesota in la hubiyo caddaalad, saxnaan, sinaan, iyo joogteyn marka la bixinaayo deeqaha tartanka ah. Tani waxay ku jirtaa hirgelinta kala duwanaanta iyo ka mid noqoshada marka la bixinayo

deeqaha [Office of Grants Management \(OGM\) Policy 08-02: Rating Criteria for Competitive Grant Review \(PDF\)](#) oo ah hey'ada dejisaa filashada ah in barnaamijyada deeqda si ula kac ah u muujiyaan sida deeqda ugu adeegayso bulshooyinka kala duwan, gaar ahaan bulshooyinka la kulma sinaan la'aan ama kaladuwanaansho xagga adeega.

- Barnaamijkan deeqda wuxuu u adeegaa beeraleyda ganacsiga ee magaalooyinka Minnesota. Mudnaanta waxaa la siin doonaa beeraleyda ganacsiga ee ku yaal gudaha magaalooyinka ama alaabtooda ku iibisa bulsho dhibban, sida lagu go'aamiyay iyadoo la adeegsanayo qalabka kharideedka Communities Index [map tool](#).

Natiijooyinka deeqdan waxaa ka mid noqon doona hirgelinta hababka ilaalinta deegaanka oo ay sameeyaan beeraleyda magaalooyinka iyo kuwa ku dhow magaalooyinka Minnesota.

Sida loo codsado

Ka codso Urban Farm Conservation Mini-Grant adigoo adeegsanaya nidaamka codsiyada onlaynka [online application system](#) ee MDA.

- Haddii aad tahay codsade cusub, waa inaad marka hore abuurtaa akoon.
- Eeg buugga tilmaamaha [how-to guide \(PDF\)](#) haddii aad qabto su'aalo marka aad dejinayso akoontigaaga.
- Markaad gasho akoontiga, xulo "Urban Farm Conservation Mini-Grant."
- Haddii aadan awoodin inaad isticmaasho nidaamka codsiga onlaynka ah, nala soo xiriir si aad hab kale ugu codsato.

Codsiyada waa in la gudbiyaa ugu dambayn **4 galabnimo CT, bisha Diseembar 18keeda 2025.**

- MDA ma aqbali doonto codsiyo daahay.
- Ku codso goor hore si aad u haysato waqti ku filan haddii aad u baahan tahay caawimaad nidaamka onlaynka ah. Waxaa lagu taliyay in codsigaaga aad gudbiso ugu yaraan 24 saacadood ka hor waqtiga kama dambaysta ah.
- MDA mas'uul kama aha dhibaato kasta oo farsamo ah ama mid hab-maamuus ah oo keenta in codsiga la gudbiyo goor dambe. Waa mas'uuliyaddaada inaad hubiso in codsigaaga na soo gaaro ka hor waqtiga kama dambaysta ah.
- Markaad gudbiso codsigaaga, waxaad heli doontaa iimayl xaqiijin ah. Haddii aadan helin iimaylkan, la xiriir Emily Toner cinwaanka emily.toner@state.mn.us.

Codsadayaasha waa inay gudbiyaan dhammaan qaybaha codsiga si loo tixgeliyo inuu dhammaystiran yahay, oo ay ku jiraan lifaaqyada.

- MDA waxay diidi doontaa codsiyada aan dhammaystirnayn, lamana qiimeyn doono.
- Ha bixin wax agab ah oo aan lagu codsan dukumentigan Request for Proposals. Agabkaas lama tixgelin doono mana la qiimeyn doono.

MDA waxay xaq u leedahay inay diido codsi kasta oo aan buuxinin shuruudahan. Hal codsi oo keliya ayaa hay'ad kasta laga aqbali doonaa (tusaale ahaan beer ama urur samafal kasta).

Marka codsi la gudbiyo, codsadaha kasta wuxuu dammaanad qaadayaa in macluumaadka la bixiyay uu yahay mid run ah, sax ah, oo lagu kalsoonaan karo ujeeddada qiimeynta deeqda suurtagalka ah. Gudbinta macluumaad

khalidan ama marin habaabin ah waxay noqon kartaa sabab lagu diido abaal-marinta deeqda, waxayna sidoo kale sababi kartaa ganaax, hakinta, ama mamnuucid sharciyeed.

Dhammaan kharashaadka ka dhasha ka jawaabista RFP-kan waxaa bixinaya codsadaha.

Tilmaamaha codsiga

- Isticmaal luqad fudud oo si sahlan loo fahmi karo. Qor adigoo maskaxda ku haya dadka dib-u-eegaya ee leh aqoon guud laakiin aan si qoto dheer ugu takhasusin beeraha magaalooyinka ee ganacsiga ah.
- Ka jawaab dhammaan su'aalaha si buuxda.
- Dib u eeg Qaabka Qiimeynta Mashruuca [Project Evaluation Profile](#) ee ku lifaaqan dokumentigan. Waxaa loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo laguna isbarbardhigo codsiyada deeqaha.
- Hubi in miisaaniyaddaada dhab tahay oo ay ka koobantahay waxyaabaha u qalma oo keliya. Qor sharaxaad faahfaahsan oo miisaaniyadda ah oo si cad u tilmaamaysa sida lacagta loo isticmaali doono. Faahfaahin badan ayaa ka fiican mid yar.
- Codsiyo daahay lama aqbali doono. Ku codso goor hore si aad waqti ugu haysato caawimaad haddii loo baahdo. Waxaa lagu.

Jadwalka iyo Waqtiyada Kama Dambaysta ah

Khamaista, Noofembar 6, 2025 ----- Waqtiga codsiyada ayaa furmaya

Khamaista, Diseembar 11, 2025----- Waqtiga kama dambaysta ee gudbinta su'aalaha ku saabsan deeqda

Khamaista, Diseembar 18, 2025, 4 galabnimo ---- Waqtiga Bartamaha (CT) Codsiyada waa in la gudbiyaa

Febraayo 2026 (la qiyaasayo----- Codsadayaasha ayaa go'aannada lagu wargelin doonaa

Su'aalaha

Su'aalaha la xiriira barnaamijka deeqda ama codsiga:

- Ku soo gudbi qoraal ahaan illaa Diseembar 11, 2025.
- U dir iimayl Emily Toner cinwaanka emily.toner@state.mn.us
- adigoo ku qoraya "Urban Farm Mini-Grant" khadka mowduuca (subject).
- Dhammaan jawaabaha waxaa lagu dhejin doonaa Urban Farm Conservation Mini-Grant webpage. Su'aalaha iyo jawaabaha cusub waxaa lagu dari doonaa bogga marka la helo. Su'aalaha dadweynaha ee ku saabsan barnaamijkan waxaa lagu dhejin doonaa bogga deeqda oo wata jawaabaha si loo hubiyo hufnaan iyo in dhammaan dadka suurtagalka ah ee codsanaya ay helaan isla macluumaadka.

Ogeysiis: Shaqaalaha MDA looma oggola inay bixiyaan talo ama jawaab-celin ku saabsan codsi kasta.

Codsadayaasha raadsada ama hela talo shaqaale MDA ah oo aan idmanayn waxaa laga yaabaa in laga saaro u-qalmitaanka abaalmarinta deeqda.

Caawimaad ku saabsan nidaamka codsiga onlaynka ah:

- Wac 651-201-6034, ama
- U dir iimayl Emily Toner cinwaanka emily.toner@state.mn.us adigoo ku qoraya "Urban Farm Mini-Grant" khadka mowduuca.

U-qalmitaanka

Codsadayaasha u qalma— Shuruudaha ugu yar

Codsadayaasha waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda si loo tixgeliyo fursaddan deeqda:

- Ahaanshaha beer ganacsi, taasoo micnaheedu yahay inaad iibiso ama deeqdo ugu yaraan \$1,000 oo ah alaabtaada beeraha sanadkii. (Eeg [geexida](#) “beer ganacsi” iyo “iibinta alaabta beeraha”).
- Beerta waa inay ku taallaa meel ku taal Minnesota oo buuxisa mid ka mid ah shuruudahan soo socda:
 - Magaalo Minnesota ah oo leh dad ka badan 5,000, ama iibisa alaabtooda macaamiisha ku nool mid ka mid ah magaalooyinkaas; ama
 - Gudaha xadka dhulka qowmiyadaha si rasmi ah u diiwaangashan ee federaalka oo u adeegaya xubnaha bulshada qowmiyadahaas, iyadoo aan loo eegin tirada dadka.
- Awood u lahaanshaha bixinta caddayn muujinaysa in aan la helin wax ka badan \$300,000 oo iib ah sanadkii ee beeraha saddexdii sano ee kalandarka ee la soo dhaafay (2022–2024).
- Inuu ku jiro xaalad wanaagsan oo la xiriiirta Dowladda Minnesota.
 - Inaan lagu lahayn canshuurihii hore ee la bixin waayay.
 - In aanay jirin deymo la bixiyey oo la waayay oo ay dammaanad qaaday dowladdu toddobadii sano ee la soo dhaafay.
 - Inuu leeyahay waxqabad lagu qanco oo ku saabsan deeqihii hore ee MDA.
 - Inuu waafaqsan yahay xeerarka hadda ee dawladda.
 - Inuu si habboon u haysto rukhsad ganacsi oo uu ku shaqeeyo gudaha Minnesota.
 - In aan laga mamnuucin ama laga joojin inuu ganacsi la yeesho Dowladda Minnesota ama dowladda federaalka.
 - In aanay jirin ciqaab dambi maaliyadeed oo lagu xukumay madaxdiisa 10-kii sano ee la soo dhaafay.

Tusaalooyinka codsadaayaasha u qalma waxaa ka mid ah laakiin kuma eka:

- Ganacsiyada faa’iido doonka ah oo ay ku jiraan milkiilayaasha keliya iyo shirkadaha xaddidan (LLCs)
- Hay’adaha aan faa’iido doonka ahayn
- Qowmiyadaha madaxbannaan, ururada ama hay’adaha waxbarasho, iyo bulshooyinka
- Dowladaha hoose ama degmooyinka
- Dugsiyada Pre-K ilaa 12, dugsiyada kale ama jaamacadaha (dadweyne ama gaar ah)

Lacagta la siiyo beeralayda ganacsiga magaalooyinka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo qalab, agab, iyo adeegyo ay u baahan karaan si ay u hirgeliyaan hab beeris oo ilaalin ku salaysan si ay u maareeyaan ciidda, biyaha, dhirta, iyo xoolaha beerahooda.

Mashaariicda u qalma

Lacagta la siiyo beeralayda ganacsiga magaalooyinka waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo qalab, agab, iyo adeegyo ay u baahan karaan si ay u hirgeliyaan hab beeris oo ilaalin ku salaysan si ay u maareeyaan ciidda, biyaha, dhirta, iyo xoolaha beerahooda.

Mashaariicda u qalma waa inay:

- Ujeedadooda tahay ilaalinta kheyraadka ciidda, biyaha, hawada, dhirta, ama xoolaha ee beer magaalo.
- Dhammaan hal sano ama ka yar gudaheed.
- Ka dhacaan gudaha gobolka Minnesota.
- Soo gudbiyaan codsi dhammaystiran oo waafaqsan RFP-kan.
- Aan bilaaban ilaa heshiiska qandaraaska deeqda ay saxeexaan dhammaan dhinacyada isla markaana uu dhaqan galo. Lama iibsano karo ama lama qandaraasi karo alaabo iyo adeegyo ka hor inta aan si buuxda loo dhaqan gelin heshiiska deeqda..

Mashaariicda ilaalinta beeraha magaalooyinka ee ku habboon barnaamijkan deeqda waxaa ka mid ah laakiin kuma eka:

- Hagaajinta ciidda
 - Baaritaanka ciidda oo ay ku jiraan nafaqooyinka, noolaha, iyo wasakhda
 - Xarumaha bacriminta beeraha magaalooyinka
 - Daboolid isku dhafan oo noocyo kala duwan leh
 - Isbeddel dalagyo khaas ah
 - Yaraynta qodista ciidda
 - Nidaamyada sariiraha kor loo qaaday oo ay ku jiraan ciidda iyo bacriminta
- Maareynta biyaha
 - Nidaamyada waraabka yaryar
 - Ku daboolidda walxo dabiici ah
 - Dhalooyinka roobka iyo maareynta biyaha roobka
- Caafimaadka dhirta iyo xoolaha
 - Isku dhafyo ubaxyo soo jiita shinnida iyo cayayaanka kale
 - Dhirta sanadlaha ah oo ay ku jiraan xuduudaha beeraha
 - Daaweynta cawska si ilaalin lagu saleeyay
 - Nidaamyada godadka hooseeya (low tunnels)
 - Kaymaha magaalooyinka
- Codsadayaasha doonaya inay soo jeediyaan hab ilaalin oo aan ku jirin liiskan, waxay caddayn karaan iyadoo lagu xiriirinayo [arrin kheyraad oo uu geexay NRCS](#) oo ay ku sharxaan codsigooda.

Kharashaadka u qalma

Kharashaadka u qalma waa kuwa si toos ah ula xiriira natiijooyinka mashruuca. Tusaalooyinka kharashaadka laga yaabo inay la xiriiraan mashruuca waxaa ka mid ah:

- Qalab iyo agab;
- Qalab iyo alaab, sida walxaha sariiraha kor loo qaaday; qaababka iyo daboollada godadka hoose; cawska daboolka; iwm., kuwaas oo ka qayb qaata hababka ilaalinta;
- Khidmadaha adeegyada sida baaritaanka ciidda ama taageerada qandaraaslaha si uu u fuliyo shaqada mashruuca; iyo
- Dhirta iyo abuurka sanadlaha ah ee loo baahan yahay si loo fuliyo hababka ilaalinta.

Haddii aan aqbalno soo jeedintaada, waxaan dib kuu siin doonaa kharashaadka u qalma ee ku jira miisaaniyadda mashruucaaga. Waa inaad soo gudbisaa dukumentiyada ay ku jiraan biilasha iyo caddaynta bixinta.

- Soo gudbi biilka oo bixi dhammaan iibsiyada la oggolaaday 30 maalmood kalandari gudahood laga bilaabo dhammaadka muddada heshiiska deeqda.
- Kharash kasta oo lagu bixiyo ka baxsan muddadan la cayimay laguma bixin doono magdhow haddii aan wax ka beddel rasmi ah lagu samayn heshiiskaaga.
- Kharash kasta oo la bixiyo ka hor taariikhda lagu saxeexay heshiiska deeqda laguma soo celin doono.

Kharashaadka aan u qalmin

Deeqda ma dabooli doonto:

- Aqallada waaweyn ee caagga ah ama kuwa wareega ([fiiri barnaamijka NRCS EQIP si aad u hesho maalgelin suurtagal ah](#))
- Kaabayaasha goosashada ka dib
- Iibsashada dhul ama hanti ma guurto ah
- Waqtiga shaqaalaha beeraha magaalooyinka

Kharashaadka kale ee aan u qalmin waxaa ka mid ah laakiin kuma eka:

- Kharashaadka dhacay ka hor inta aan heshiiska deeqda ay saxeexin dhammaan dhinacyada ama taariikhda uu bilaabanayo (midda dambe ayaa la raacayaa). Kharash kasta oo la bixiyo ka hor inta aan heshiiska deeqda si buuxda loo dhaqan gelin waa khatar codsadaha wuxuuna noqonayaa mid aan la soo celin.
- Kharashaadka dhacay ka dib marka uu heshiiska deeqda dhamaado.
- Kharashaadka lagu bixiyo lacag caddaan ah haddii aan si gaar ah horay loo oggolaan MDA.
- Kharashaadka dhacay ka hor inta aan la saxeexin heshiiska deeqda.
- Ganaaxyada, ciqaabta, iyo kharashaadka kale ee ka dhasha ku xadgudub sharciyada federaalka, dawladda, deegaanka, ama qowmiyadaha.
- Madadaalo, waxyaabo lagu maaweelo, ama kharashyada la xiriira sida tigidada bandhigyada ama ciyaaraha, cuntada, hoyga, kirada, safarka, khamriga, iyo gunnooyinka.
- Khidmadaha daahitaanka bixinta, danaha, ama lacagaha kaydka.
- Xayeysiinta, xiriirka dadweynaha, madadaalada, khamriga, iyo kharashaadka maaweelada.
- Canshuuraha, marka laga reebo canshuurta iibka ee alaabta, adeegyada iyo mushaharka.
- Kharashaadka aan si toos ah loola xiriirin mashruuca.
- Kharashaadka codsiga, oo ay ku jiraan kharashaadka lagu diyaarinayo dukumentiyada qiimeynta awoodda hore ee abaalmarinta.
- Kharashaadka horey loogu bixiyay ama lagu bixin doono maalgelin federaal, gobol ama degmo kale. Mashaariicda horey u heshay maalgelin kale laguma maalgelin karo isla hawlahaas iyo kharashaadkaas.
- Deyn xun, khidmadaha daahitaanka bixinta, danaha, kharashaadka sharciga, ama lacagaha kaydka.
- Xadgudubyada taraafikada ama baarkinka.

- Kharashaadka safarka iyo gaadiidka ka baxsan gobolka. Minnesota ayaa loo tixgelin doonaa gobolka hooyo marka la go'aaminayo safarka dibadda.
- Qareenno saameyn siyaasadeed ama deeqo siyaasadeed.
- Uruurinta lacagaha, ololayaasha maalgelinta, ama codsiyada deeqaha iyo hadiyadaha, iyo kharashaadka la xiriira ururinta deeqaha.
- Hawlaha siyaasadeed sida ku cad qodobada Xeerka Hatch (5 United States Code 1501–1508 iyo 7324–7326).
- Kharashaadka horey loogu bixiyay ama lagu bixin doono maalgelin federaal, gobol ama degmo kale. Mashaariicda horey u heshay maalgelin kale laguma maalgelin karo isla hawlahaas iyo kharashaadkaas.

Hannaanka Dib-u-eegista Codsiga

Dhammaan codsiyada u qalma deeqda waxaa dib u eegi doona shaqaalaha MDA iyo dib-u-eegayaal dibadda ah iyadoo lagu saleynayo shuruudaha ku jira qaabka qiimaynta. Guddiga dib-u-eegista wuxuu qiimayn doonaa codsi kasta iyadoo la adeegsanayo nidaam 100-dhibcood ah. Eeg Qaabka Qiimaynta Mashruuca ([Project Evaluation Profile](#)) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Hannaanka dib-u-eegista

Dib-u-eegayaasha waxay soo jeedin karaan maalgelin dhan ama qayb ah oo mashruuc ah. Wasiirka Beeraha ayaa helaya talooyinka dib-u-eegayaasha wuxuuna go'aaminayaa cidda la abaalmarinayo. Dib-u-eegayaasha, shaqaalaha, iyo wasiirka waxay tixgelin karaan qaybsiga juquraafiyeed, adeegyada loo fidinayo dadka mudnaanta leh, taariikhda codsadaha ee ku aaddan deeqaha dawladda—oo ay ku jiraan waxqabadka deeqihii hore—iyo awoodda codsadaha ee fulinta shaqada la xiriirta codsiga deeqda.

MDA waxay ku wargelin doontaa codsabayaasha, guuleystay iyo kuwa aan guuleysan labadaba, qoraal ahaan. Codsabayaashu waxay codsan karaan in dib-u-eegis laga siiyo codsigooda..

Dib-u-eegista awoodda codsadaha deeqda

MDA waxaa looga baahan yahay inay tixgeliso waxqabadkii hore iyo awoodda maaliyadeed iyo midda hawlga ee codsadaha deeqda ka hor inta aan la siin deeq ([MINN. STAT. 16B.981](#), [OGM Policy 08-02: Policy on Rating Criteria for Competitive Grant Review \(PDF\)](#), iyo [OGM Policy 08-06: Preaward Risk Assessment of Potential Grantees \(PDF\)](#)).

Dhammaan codsabayaasha waxay buuxin doonaan soo koobidda awoodda oo qayb ka ah codsigooda, taas oo sharaxaysa deeqihii hore ee ay ka heleen MDA iyo taariikhda waxqabadkooda ee shaqada la xiriirta codsiga deeqda.

Codsabayaasha deeqda waxaa laga yaabaa in lagu waajibiyo inay keenaan dukumentiyada maaliyadeed, awood, iyo xakamaynta gudaha ah oo ay ku jiraan sharaxaado ku saabsan sida ay u maareeyaan kharashaadka ganacsiga. Tusaalooyinka dukumentiyada laga yaabo in la dalbado waxaa ka mid ah canshuur celinta federaalka iyo gobolka iyo bayaanka maaliyadeed (ee codsabayaasha faa'iido doonka ah), ama bayaannada maaliyadeed ee

ugu dambeeyay ee guddiga uu dib u eegay, foomka IRS 990, ama kormeerka maaliyadeed ee shahaadaysan ee ugu dambeeyay (ee hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn).

Haddii MDA ay go'aamiso in deeq bixiyaha leeyahay khataro weyn oo wiiqaya awooddiisa uu ku fulin karo waajibaadka looga baahan yahay heshiiska deeqda, MDA waxay yeelan kartaa mid ka mid ah tallaabooyinkan: waxay codsan kartaa macluumaad dheeraad ah si loo xaliyo walaacyada, waxay horumarin kartaa qorshe lagu yareynayo khatarta si loo ilaaliyo danaha dawladda, ama waxay go'aansan kartaa inaan la siin deeqda.

Iska hor imaadyada danaha

Siyaasadda deeqaha gobolka waxay u baahan tahay in tallaabooyin iyo habraacyo la dhiso si looga hortago iska hor imaadyada danaha ee shaqsiga iyo hay'adaha, labadaba—ee la xiriira codsabayaasha iyo dib-u-eegayaasha Siyaasadda Iska Hor Imaadka Danaha ee Deeqaha Gobolka ([MINN. STAT. 16B.98 Subd. 2-3](#) iyo [OGM Policy 08-01 Conflict of Interest in State Grant-Making Policy](#)).

Iska hor imaad hay'adeed wuxuu dhacaa marka:

- Codsade ama deeq-bixiye uusan awoodin ama laga yaabo inuusan awoodin inuu bixiyo gargaar ama talo madax-bannaan oo uu siiyo waaxda sababo la xiriira waajibaadyo ama daacadnimooyin isku dhafan.
- Ujeeddada deeq-bixiyaha ama codsadaha ee fulinta deeqda ay tahay ama laga yaabo inay noqoto mid wiiqanta sabab la xiriirta waajibaadyo ama daacadnimooyin kale.

Tusaale iska hor imaad danaha ah waa marka iibiyaha ama qaybiyaha uu qoro codsi deeq ah oo uu u qorayo codsadaha halka iibiyuhu uu ka faa'iidi doono abaalmarinta deeqda.

Xaaladaha ay jirto su'aal ama la shaaciyay iska hor imaad danta ah, codsabayaasha ama deeq-bixiyeyaasha waa la ogeysiin doonaa waxaana la qaadi karaa tallaabooyin ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xaddidnayn, dib u habaynta qorshaha shaqada ee deeqda ama waajibaadka deeq-bixiyaha si loo yareeyo khatarta, codsashada in codsadaha keeno qorshe lagu yareynayo iska hor imaadka danta hay'adeed, ka saaridda u-qalanka deeqda, wax-ka-beddelka deeqda, ama joojinta heshiiska deeqda.

Ogeysiiska asturnaanta iyo kala soocidda xogta

Macluumaadka uu bixiyo codsadaha waxaa loo isticmaali doonaa in lagu qiimeeyo u-qalanka codsadaha ee helitaanka deeqdan barnaamijkan hoostiisa. Go'aanka lagu codsanayo deeqdan waa mid ikhtiyaari ah, mana jirto waajibaad sharci ah oo ku khasbaya codsabayaasha inay bixiyaan macluumaadka la codsaday.

Codsabayaashu way diidi karaan inay buuxiyaan codsigan iyagoo aan la kulmayn cawaaqib sharci ah. Si kastaba ha ahaatee, kaliya codsiyada buuxa ayaa la tixgelin doonaa; codsiyada aan dhammaystirnayn lama tixgelin doono.

Xogta lagu bixiyo codsigan waxaa markii hore loo kala saaraa sida xog gaar ah ama aan guud ahayn sida uu dhigayo Xeerka Habraacyada Xogta ee Minnesota, inkastoo qayb ka mid ah ama dhammaan xogta guud ahaan ay noqon doonto xog dadweyne waqtiyo kala duwan oo ka mid ah habka codsiga ilaa haddii aysan si kale u qeexin sharci dowladeed ama federaal ah. Helitaanka xogta gaarka ah ama aan guudka ahayn waxaa loo xadiday kuwa uu sharci oggol yahay, kuwaas oo ay ku jiraan shaqaalaha MDA iyo qandaraasleyaasha leh shaqo sharci ah oo ay ku heli karaan xogta, dhinacyada uu codsaduho oggolaaday, dhinacyada lagu magacaabay amar maxkamadeed ama warqad maxkamadeed federaal ah, Minnesota Management and Budget, Minnesota

Department of Administration, kormeeraha guud ee gobolka, iyo kormeeraha sharci-dejinta. Haddii loo baahdo, MDA waxay xogta la wadaagi kartaa booliska ama Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Iyadoo la raacayo sharciga Minnesota ee deeqaha ([MINN. STAT. 13.599](#)):

- Magacyada iyo cinwaanada codsadayaasha deeqda, iyo qadarka deeqda la codsaday, waxay noqon doonaan xog dadweyne marka codsiyada la furo.
- Dhammaan xogta kale ee ku jirta jawaabaha codsiyada (marka laga reebo xogta si kale sharci ahaan loo kala saaray, oo ay ku jirto xogta sirta ganacsiga) waxay noqoneysaa xog dadweyne marka habka qiimeynta la dhammaystiro (ee deeqdan, marka dhammaan heshiisyada deeqaha si buuxda loo fuliyo)
- Dhammaan xogta ay MDA abuurto ama kaydiso qayb ka ah habka qiimeynta (marka laga reebo xogta sirta ganacsiga) guud ahaan waxay noqon doontaa xog dadweyne marka qiimeynta la dhammaystiro.

Habraaca sheegashada ilaalinta xogta sirta ganacsiga:

Xogta sirta ganacsiga waxaa loo kala saaraa xog aan guud ahayn. Si xogta u noqoto xog sir ah, waa in xogta ay bixiso qofka ay khusayso (tusaale, xogta waa inay ka hadlaysaa codsadaha) isla markaana ay buuxiso qeexitaanka sharciga “Right of Setoff” ([MINN. STAT. 13.37, subd. 1\(b\)](#)). Si codsade uu u dalbado ilaalinta xogta sirta ganacsiga ee qayb ka ah codsigan: waa inuu 1) si cad u aqoonsadaa qaacidada, qaabka, ururinta, barnaamijka, qalabka, habka, farsamada ama nidaamka uu rumeysan yahay inuu yahay xog sir ah; 2) sharaxaa dadaallada uu codsadaha u sameeyo ilaalinta sirta xogta; iyo 3) si ku filan u sharaxaa sida xogtu u leedahay qiime dhaqaale oo madax-bannaan sababtoo ah aan si guud loo aqoon ama aan si fudud loo heli karin. Kaliya sheegashada in xogtu tahay “sir ganacsi” ma dhigeysa sharci ahaan in xogtaas la kala saaro sida aan guud ahayn; go’aaminta waxa loo tixgelinayo xog sir ganacsi waa masuuliyad sharci oo MDA ah, waana mid MDA aysan dammaanad qaadi karin. Haddii MDA ay go’aamiso in xogtu aysan buuxin qeexitaanka xogta sirta ganacsiga, xogtaas waa laga heli doonaa dadweynaha ilaa codsaduhu helo amar maxkamadeed oo si kale ah.

Dhammaan dadka, ganacsiyada, iyo shakhsiyaadka codsada deeqaha ee gobolka Minnesota waa inay u hoggaansamaan sharciyada khuseeya. Sida uu dhigayo sharciga ([MINN. STAT. 270C.65, subd. 3](#)), deeq-bixiyaha wuxuu oggolaanayaa in la shaaciyo lambarkiisa aqoonsiga bulshada (Social Security Number), lambarka aqoonsiga canshuuraha federaalka ama Minnesota ee hore loo siiyay dawladda, loona gudbiyo hay’adaha canshuuraha ee federaalka iyo gobolka, iyo shaqaalaha dawladda ee ku lugta leh bixinta lacagaha waajibaadka gobolka. Lambarradan aqoonsiga waxaa loo isticmaali karaa fulinta sharciyada canshuuraha ee federaalka iyo gobolka, taasoo keeni karta in deeq-bixiyaha lagu qasbo inuu soo gudbiyo canshuur celinta gobolka iyo bixinta canshuuraha gobolka ee dib u dhacay haddii ay jiraan.

Shuruudaha uu ku Qasban Yahay Deeq Qaataha

Heshiisyada Qandaraaska Deeqda

Qof kasta oo deeq helo waa inuu si rasmi ah u galaa heshiis qandaraas oo deeq ah. Heshiiskan qandaraaska deeqda wuxuu ka hadlayaa shuruudaha abaalmarinta, oo ay ku jirto fulinta mashruuca. Qaataha deeqda waa inuu akhriyaa heshiiska qandaraaska deeqda, saxiixaa, kadibna marka la saxiixo waa inuu u hoggaansamaa dhammaan shuruudaha ku jira heshiiskaas. Shaqo kasta oo la xiriirta mashruuca deeqda lama bilaabi karo ilaa

heshiiska qandaraaska deeqda si buuxda loo dhaqan geliyo lana ogeysiyo qaataha deeqda in shaqadu bilaaban karto. Codsadaha la maalgeliyay ayaa si sharci ah mas'uul uga noqon doona fulinta qorshaha shaqada iyo u hoggaansanaanta dhammaan shuruudaha dowladeed iyo federaal ee khuseeya, oo ay ku jiraan caymiska magdhawga shaqaalaha, caddaalad darrada shaqaalaysiinta (nondiscrimination), asturnaanta xogta, waafaqsanaanta miisaaniyadda, iyo warbixinta.

Marka codsiga la ansixiyo, lana dhammaystiro dib u eegista awoodda qaataha deeqda inta aan la bilaabin mashruuca iyo in la helo lacag celin, codsadaha la xusho waa inuu:

- Buuxiyaa foomka IRS W-9 ama isdiwaangeliyaa inuu yahay iibiyaha (vendor) nidaamka xisaabaadka gobolka ee SWIFT, ama xaqiijiyaa in xogta ku jirta SWIFT ay sax tahay.
- Soo gudbiyaa dukumentiyada iyo shahaadooyinka kale ee la codsaday 21 maalmood gudahood laga bilaabo ogeysiinta abaalmarinta.
- Saxiixaa heshiiska qandaraaska deeqda si uu u muujiyo damaciisa ah inuu dhammaystiro howlaha lagu qorsheeyay 21 maalmood gudahood markii loo soo diro. Haddii heshiiska aan la saxiixin 21 maalmood gudahood, abaalmarinta waa laga noqon karaa.

Mas'uuliyadda iyo Shuruudaha Warbixinta

